

Xuquuqda iyo Waajibaadka Ka Qeybqaataha Barnaamijka Haweenka Dhallaanka iyo Caruurta ee (WIC)

Waan heley macluumaad ku saabsan xuquuqdayda iyo waajibaadka isaan ee ku saabsan sida qof ka qeybqaata barnaamijka ee WIC. Waan fahamsan nahay xuquuqda aan leeyahay ee ah:

- *In shaqaalaha WIC iyo shaqaalaha dukaanka aan ka helo oo la igula dhaqmaan si xaq ah oo ixtiraam mudan.*
- *In macluumaadka aan siiyo shaqaalaha WIC ahaadaan kuwo asturan. Lama siinayo qof dibadda ka ah barnaamijka WIC idinkeysa la aantiisa.*
- *In aan helo waxbarasho ku saabsan nafaqada iyo macluumaad ku saabsan daryeelka caafimaadka iyo adeegyo kale oo waxtar leh.*
- *In aan isticmaalo dukaan kasta ama farmashiyo kasta oo ku taala Gobolka New York oo u fasaxan inay ogolaadaan barnaamijka WIC.*
- *In aan helo xirmo cunto ee buuxisa baahideyda nafaqa, ama kuwa caruurteyda.*
- *In la ii wareejiyo hay'ad WIC kale oo maxalli ah.*
- *In la iisheego goorta iyo sababta loo joojinayo manfacyada barnaamijkega WIC ga.*
- *In aan dhegaysi caadil ah ama hufan aan weydiisto haddii aannan ku qanacsinayn go'aanda quseeya xaq u yeelashadeyda.*

Macluumaadka aan bixiyay oo lagu ogaanayo haddii aan xaq u leeyahay Barnaamijka WIC waa mid sax ah, sida ugu wanaagsan ee aan u ogsoonahay. Waan ogsoonahay in:

- *Shaqaalaha Barnaamijka WIC waxaa laga yaabaa in ay baaraan macluumaadka aan iyagu siiyay si ay markaasi u xaqiijiyaan inuu sax yahay.*
- *Waa in aad ku wargeliyaa xafiiska WIC ee degaankeyga haddii aan qorsheynayo in aan guuro, taleefoon lambarkeyga uu isbadelo, dakhliga qof ka tirsan qoyskeyga uu isbadelo, ama haddii aan doonayo in aan u badesho xafiis WIC kale.*
- *Haddii aan sheego hadal been ah ama marin-habaabin leh ama aan ka gaabiyo ama la haro macluumaad aniga oo ay ulajeeddadeydu tahay si aan u helo manfacyada WIC, waxaa dhici karta in Dowladda (State) ay iweydiisato in aan dib u bixiyo manfacyadii sida qaladka ahayd ee aan uqaatay. Waxaa dhici karta in si sharci ah ay mas'uuliyiinta dowladda Dhexe ama Dowlada New York dembi igu qaadaan.*
- *Waxaa dhici karta in aan ka qeybqaato hal Barnaamij oo WIC ah kaliya ama hal Barnaamijka Adeegga Cuntada Kabka (CSFP). Waxaan cadeynayaa in aniga aannan iminka qaadanayn Barnaamij kale oo WIC ah ama CSFP.*
- *Cuntada WIC waxaa kaliya loogu talagalay xubnaha qoyska ee ka qeybqaata barnaamijka. Ma iibin karo ama cid ma siin karo cuntada WIC iyo jeegga WIC.*
- *Haddii loo baahdo in la iga badelo inta la isiiyo ama mudo yar la iga joojio, waxaan wici doonaa xafiiska WIC ee ii dhow.*

Waan la socdaa in hay'adda maxaliga ay adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada nafaqada ayay ii diyaarin doonaan, oo waxaa la igu dhiiri geliyay in aan ka qeybqaato adeegyadan.

Waxaa laga yaabaa inaan racfaan ka qaato go'aanka ay hay'adda maxaliga ka gaarto ee quseeya xaq ula'haanshahayga Barnaamijkan.

Waan la socdaa in heerarka xaq uyeelashada iyo ka qeybqaadashada Barnaamijka WIC ay qof kasta isla mid yihiin, iyadoon loo egeyn jinsi, midab, qofka halka uu ka soo jeedo, da'da, itaal-daro, ama jinsiga qofka.

Kani waa bayaaanka xaqiijinta ee kugu waajibta in aad ku saxiixdid nidaamka kumbuyuutarka kahor inta aadan helin jeegagga WIC:

Waxaa la igula taliyay xuquuqaheysa iyo waajibaadyadeyda ee hoos imaanaya Barnaamijka WIC. Waxaan xaqiijinayaa in xogta aan u bixiyay go'aaminta u-qalmiitankeyga ay tahay mid dhammeystiran oo sax ah sida aqoonteyda ugu flican. Xogtan waxaa loo bixiyay si aan u helo dheefaha WIC waxaana fahansanahay in mas'uuliyiinta wakaaladda WIC ee degaanka ama tan gobolka ay xaqiijin karaan xogtan. Waxaan sidoo kale fahansanahay in khalad u fasilidda ulakaca ah ay ii keeni karto dambi ku soo oogid xeerka madaniga ah ee hoos imaanaya sharcigga dowladda dhexe ama/iyo kan gobolka. Khalad u fasilidda ulakaca ah waxaa ka mid ah, balse aan ku xadidnayn, si ulakac ah ugu been-u abuuridda, qarinta ama baabi'inta dakhliga qoyska, weynaanta qoyska, xogta caafimaadka, xaalka Medicaid iyo goobta degaanshaha. Waxaan intaasi dheer oo aan fahansanahay in sameynta hadal beenta ah ama marin-habaabin ah ama si khalad ah u fasilidda, qarinta

ama baabi'inta xaqiiqooyinka ay ii keeni karaan in aan u-qalmi waayo ama in la iga doono in aan dib u bixiyo qiimaha lacagta ee dheefaha cuntada ee aan ku helay sida aan habboonayn ayadoo aan tixgelin la siinayn haddii aan uga danlaaha in aan si habboonayn ku helo dheefaha iyo haddii kaleba. Waxaan ugu dambeyntii fahansanahay in aad kaliya ka qaybqaadan doono hal Barnaamijka WIC ama hal Barnaamijka Cuntada Badeecada Dheeraadka ah (CSFP) waxaana halkan ku caddeynayaa in aan hadda la joogo ku qornayn wax barnaamijka WIC ah ama Barnaamijka Cuntada Badeecada Dheeraadka ah (CSFP). Waxaan codsanayaa in jeegagga la soosaaro kadibna maanta la isiiyo aniga.

Codsashada Dhegaysi Hufan

Haddii lagu diiday in aad ka qeybqaadato Barnaamijka WIC ama uqalmi waydo, waxaad xaq u leedahay in aad weydiisato Dhegeysi Hufan haddii aaddan go'aanka ku raacsanayn. Waa in lagu siyaa ogeysiis qoraal ah ee quseeya xuqaaqdaada ku saabsan Dhegeysiga Hufan. Waxaad weydiisan kartaa kulan inaad la yeelato hay'adda maxaliga ah todoba maalmood gudahooda si aad uga wada hadashaan welwelkaaga ka hor inta aaddan weydiisan Dhegeysi Hufan. Waa inaad hay'adda maxaliga oo aad weydiisataa Dhegeysi Hufan 60 maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta lagu diiday ama aad uqalmi weydey. Shaqaalaha hay'adda maxaliga ayaa diyaar u ah in ay kaa caawiyaan si aad ubuuxiso foomka cabashada.

Bayaanka Takoorid La'aanta USDA

Waaxda Beeraha ee Mareykanka Waxay mamnuucaysaa takooridda ka dhanka ah macaamiisheeda, shaqaalaha, iyo codsadeyaasheeda shaqo ee ku saleysan jinsigga, midabka, asalka wadanka qofka, da'da, naafonimada, lab ama dheddig ahaan, aqoonsigga jinsi, diin, aargudasho, iyo meesha loo adeegsan karo, aaminsanaanta siyaasadeed, xaalka guurka, xaalka waalidnimo ama qoys, dookha galmo, ama dhammaan ama qayb ka mid ah dakhliga shakhsiga laga helo barnaamij gargaar dadweyne, ama xogta la dhowro ee firka shaqada ama waxqabadka ay qabato ama ay maalgeliso Waaxda. (Ma aha in dhammaan asalada la mamnuucay loo adeegsan karo dhammaan barnaamijyada iyo/ ama waxqabadyada shaqada.)

Haddii aad doonaysid in aad soo gudbisid ashtakada takooridda barnaamijka Xuquuqda Shacabka, dhammeystir Foomka Ashtakada Takooridda ee Barnaamijka USDA, ee laga helo online barta internetka ah: http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html ama xafis kasta ee USDA, ama wac (866) 632-9992 si aad u codsatid foomka. Waxaad sidoo kale qori kartaa warqad ku qoran dhammaan xogta lagu codsadey foomka. Noogu soo dir foomka dhammeystiran ama warqadda ashataka boostada ah U.S. Department of Agriculture, Director, Office of Adjudication, 1400 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20250-9410, fakis ahaan (202) 690-7442 ama emayl ahaan noogu soo dir program.intake@usda.gov.

Shakhsiyadka dhagoolada ah, maqalkooda daciifay ama qaba itaal-la'aan hadal waxay kala xiriiri karaan USDA ayaga oo u maraya Adeega War gudbinta Dowladda Dhexe (Federal Relay Service) (800) 877-8339; ama (800) 845-6136 (Af-Isbaanish).

USDA waa bixiye fursado siman iyo loo-shaqeeye.

Bayaanka Takoorid La'aanta ee Gobolka New York

Gobolka New York wuxuu mamnuucayaa takoorka salka looga dhiggo caqiidada, xaaladda guur iyo hanaan-jinsi.

Shaqsiyaadka aaminsan in lagu sameeyey takoorid ku ah Sharciga Xuquuqda Aadanaha ee Gobolka New York waa in ay soo wacaan Qatka Caafimaadka ku Kora (Growing Up Healthy Hotline) oo ah 1-800-522-5006, ama barnaamijka WIC usoo qor WIC Program Director, NYSDOH, Riverview Center, 6th Floor West, Room 650, 150 Broadway, Albany NY 12204.

